Asylum Advice

Go’aanka kadib - Diidmo

Section 4B:
Go'aanka kadib - Diidmo

Qaybtaan wuxuu kuu macnayn doonaa wixii dhici doono haddii lagu siiyo diidmo. Haddii aad qabtid su'aalo oo gaar u ah codsigaaga magangalyo waa inaad kuwaani kala hadasho looyarkaaga oo talo ku siin karo.

4B.1 Xulashoyinka la heli karo diidmada kadib

Waraysigaaga magangalyada kadib Home Office wuxuu go'aamin karaa inuu diido codsigaaga magangalyo. Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka codsato diidmada Home Office. Haddii Home Office diido codsigaaga, wuxuu ku siin doonaa warqad ku qoran sababaha. Warqadda waxay ku qornaan doontaa af Ingiriis oo haddii aad u baahato looyarkaaga kala hadal wixii ku qoran. Warqadda waxuu xaqiijin doonaa sababta Home Office u maleeyo inaadan qancinin shuruudaha magangalyada ama badbaadinta bini'aadan. Waa inaad maraxaladaan sii taxadar ah u tixgelisa xulashoyinkaaga.

Waxaad qabtaa xulashoyinkaan:

- Waxaad xaq u lahaan kartaa inaad rafcaan ka codsato go'aanka Home Office. Waxaa kaasi loola jeedaa inaad Garsooraha Haajiraadda oo ka madax-bannan Home Office ka codsan kartid inuu dib u eego go'aanka oo sheego haddii uu raacsan yahay go'aankaas. Waa inaad kani kala hadasho looyarkaaga. Fadlan ogow in rafcaanka go'aanka Home Office loo baahan yahay in la sameeyo waqti gaar ah gudaheeda.

- Haddii aad hesho "certified refusal (diidmo sharciyeysan)" waxaa loola jeedaa inaad si otomatik xaq u leheen inaad rafcaan codsato. Laakiin waxaad codsan kartaa Judicial Review (Dib u eegida Garsoorka). Waa inaad kani kala hadasho looyarkaaga. Looyarkaaga wuxuu codsan karaa in la sameeyo Judicial Review haddii ay jiraan sababo uu sidaas ku sameeyo.

- Haddii aadan rabin inaad rafcaan codsato markaa nidaamka Assisted Voluntary Return (AVR) ayaa ah habka ugu habboon aad dalka Ingiriiska (UK) uga bixi kartid. Nidaamka AVR waxaa maamula Home Office-ka, fadlan eeg:
  www.gov.uk/return-home-voluntarily
  Voluntary Departures Team: 0300 004 0202

4B.2 Haddii aad codsato rafcaan

Haddii Home Office diido kiiskaaga oo xulato inaad isticmaasho xuquuqdaada rafcaanka, waa inaad la xiriirtaa looyarkaaga markii aad hesho ogeysiiska in codsigaaga la diidey.

Waa inay ballan kuu qabanqaabiyaan si ay uga hadlaan diidmadaada oo u diyaariyaan shurudaha rafcaanka. Si uu looyar wakiil ka noqdo oo kugu caawiyo habka legal aid (oo ku caawiyo kharashka looyarka) waa inaad caddayso in dakhligaaga hooseeyo iyo in kiiskaaga leeyahay fursad dhab ah inaad ku guuleysato. Kani waxaa loola jeedaa in gargaarka kharashka sharciga (legal aid) la bixin doono oo kaliya haddii kiiskaaga leeyahay fursad 50% ama ka badan inuu guuleysto. Looyarkaaga ayaa samayn doono baaritaanka uqalmida si loo ogaado haddii uu sidaa yahay. Haddii aad ku guuldarreysato baaritaanka uqalmida waxaa laguu diidi doonaa gargaarkaas sharciga.

4B.3 Maxaa dhici doono haddii la ii diido gargaarka kharashka sharciga?

Adiga ama looyarkaaga waxaad codsan kartiin in dib loo eego diidmada gargaarka kharashka sharciga. Fadlan looyarkaaga weydii sidaa rafcaan looga codsado diidmada gargaarka kharashka sharciga.

Haddii aanad heli karin gargaarka kharashka sharciga oo looyarkaaga si khaas ah kuu shaqayn karo, waa inaad iska bixiso kharashkiisa sharciyeed. Waa inay kuu macneeyaan, iyo waa inaad adiga ogolaataa shuruudahooda hawl-galka kahor intii ay bilaabin inay si khaas ah kula hadlaan.

Haddii laguu diido gargaarka kharashka sharciga, oo aadan awoodin inaad jeebkaaga ka bixiso kharashka looyarka, adiga ayaa wakiil iska noqon karo haddii aad sidaa xulato.

4B.4 Dhegeysiga rafcaanka -

Dhegeysiga rafcaanka waxaa lagu qabtaa Asylum Immigration Tribunal (AIT) (Maxkamadda Haajiraada Magangalyada). Kadib markii rafcaankaaga la xareeyo, waxaa laguu sheegi doonaa maxkamadda laga qaban doono dhegeysigaaga. Waxaa jiro labo maxkamadood, First-Tier Tribunal (Maxkamadda Marxaladda Koowaad) iyo Upper Tribunal (Maxkamadda Sare). Midkiiba waxuu qabaa Immigration and Asylum Chamber (Qaolka Magangalyada iyo Haajiraadda). Dalka UK waxaa ku yaalo dhowr maxkamadood. Doorka First-tier Tribunal waa inay dhegeystaan oo go'aamiyaan rafcaanada laga sameeyo go'aanada uu gaarey Home Office.

Markii taariikhda rafcaankaaga la qabanqaabiyo, waxaad heli doontaa warqad lagugu xaqiijinaayo taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qaban doono dhegeysiga maxkamaddaada. Haddii uu ku taageero Home Office, markaa waxaad codsan kartaa tikidhka socdaalka. Waxaad u baahan doontaa inaad u dirto nuqulka warqadda ballankaaga dhegeysiga iyo codsi tikidh. Waa inaad kani sameyso sida ugu dhaqsi badan. Asylum Help ayaa tan kaa caawin karta. Fadlan kala xiriir lamnbarka 0808 8000 640 haddii aad arrintaan uga baahan tahay caawinaad iyo taageero.

Asylum Immigration Tribunal (AIT) ayaa go'aamin karo (waqti walba kahor intii la sameynin dhegeysiga wayn) in mawduucyada ku qoran kiiska ay dhib yihiin, sidaa awgeeda waxuu ku xukumi karaa in kiiskaas loo gudbiyo Immigration Panel (Guddi Haajiraad) ama Senior Immigration Judge (Garsoore Sare ee Haajiraad).

Waa muhiim inaad xarunta dhegeysiga timaado ugu yaraan 30 daqiiqo dhegeysigaaga kahor. Waa inaad soo marto fatashaadda ammaanka oo ogaato qolka laga qabanaayo dhegeysigaaga. Intii uu dhegeysigaaga ka socdo waxaad qolka ku arki doontaa dadkaan:

- Immigration Judge (Garsooraha Haajiraada): Waxay fadhiisan doonaan meel minbarkiisa sarreeyo ee ku yaalo xagga horey ee qolka. Waxay hoggaamin doonaan dhegeysiga oo waxay adiga, looyarkaaga, ama Home Office Presenting Officer (Sarkaalka Wakiil ka ah Home Office) weydiin karaan su'aalo khuseeyaa kiiska.
- Home Office Presenting Officer: waxaad arki doontaa in Home Office uu soo direy wakiil si uu u soo bandhigo ra'yigooda khuseeyo kiskaaga oo u difaaco sababaha ay u diideen inay ku siiyaan fasaxa joogitaanka dalka UK.
- Markhaatiyaasha: markhaati walba ee loo wacey si ay caddayn uga baxshaan kiiskaaga.
- Turjumaanka maxkamadda: Haddii aad codsatey turjumaan, waxay ku turjumi doonaan su'aal walba uu garsooraha ku weydiiyey iyo waxay dib u turjumi doonaan jawaabtaada. Waa inay si sax ah u turjumaan wixii aad sheegto si uu Home Office u helo riikorka buuxa ee macluumaadka aad bixisey.

Turjumaanka waxaa laga rabaa in macluumaad walba aad bixiso ay ku haayaan si qarsoodi ah. Haddii aad ka welwelsan tahay turjumaankaaga ama si fiican u garan karin lahjaddiisa waa inaad sida ugu dhaqsi badan u sheegto looyarkaaga iyo Garsooraha Haajiraada. Saamayn kuma yeelan doono sida kiiskaaga loo go'aamin doono ama natiijada kiiskaaga.

Maxkamadaha waa goobo shacbiga u furan sidaa awgeeda waxaa suurtogal ah in dad kale joogaan qolka.

4B.5 Adjournments (Dib u dhigis)

Adiga ama looyarkaaga waxaad waqti walba AIT ka codsan kartiin adjournment (dib u dhigis) kadib markii la qaban-qaabiyo taariikhda dhegeysiga iyo taariikhda dhegeysigaaga kahor. Codsiga waxaa laga samayn karaa Case Management Review Hearing (Dib u Eegida Dhegeysiga iyo Maamulka Kiiska). Looyarkaaga ayaa kuu doodi karo in waqti ka badan loo baahan yahay si loo helo caddaymo taageero rafcaankaaga (sida warbixin caafimaad ama dokumentiyo laga soo diraayo dibedda).

Garsooraha, Home Office ama looyarkaaga ayaa codsan karo dib u dhigis haddii mawduuc u baahan baaritaan dheeraad ah soo baxo intii lagu jiro dhegeysiga rafcaankaaga.

Haddii dalkaaga hooyo aad ku qabtid dokumentiyo aad u maleyso inay muhiim yihiin, waa inaad sida ugu dhaqsi badan kani kala hadashaa looyarkaaga. Waxaa suurtogal ah in la daahiyo tixgelinta codsigaaga intii aad ka qaban-qaabinayso in dokumentiyadaan halkaan lo soo diro, haddii adiga iyo qoyskaaga uu ammaan u yahay inaad sidaas sameysaan.

Haddii garsooraha go'aamiyo inuu dib u dhigo dhegeysiga waa in lagu siiyo taariikh cusub ee dhegeysiga la qaban doono. Kani waa inuusan eheen in ka badan 28 maalmood kadib taariikhda dhegeysiga rasmiga ah aysan ka eheen haddii ay jiraan xaalado gaar ah.

Garsooraha wuxuu go'aamin karaa inuusan dib u dhigin oo waxaa lagaa rabi doonaa inaad tegto maxkamadda. Haddii aadan tegin, waxaa kiiskaaga go'aan laga gaari karaa adigoo joogin.

4B.6 Intuu ka socdo rafcaankaaga

Waa inaad garsooraha siido jawaab buuxda iyo macluumaadka ugu badan aad siin kartid. Garsooraha, looyarkaaga iyo wakiilka Home Office ayaa ka hadli doono sida ay sharciyada ku dhaqan galaan kiiskaaga.

Waxaad dareemi kartaa inaadan rabin inaad ka hadasho mawduucyo gaar ah, laakiin mawduucyada dhibka ah in laga hadlo ayaa lagama marmaan u noqon karo xoojinta codsigaaga. Dhammaan macluumaadka aad awoodid inaad bixiso waxay garsooraha ku caawin donaan inuu sii fiican u garto sababahaaga aad ku raadsato badbaadin.

Waa muhiim inaad runta sheegto oo bixiso macluumaadka aad awooddo inaad bixiso ee khuseeya wixii kugu dhacey iyo sababta aad badbaadin u baahan tahay.

Waxaa suurtogal ah inaadan ogeen go'aanka uu garsooraha gaarey kadib markuu dhegeysigaaga dhammaadey. Garsooraha wuxuu qaadi doonaa warqadahaaga oo wuxuu baari doonaa kiiska oo kadib wuxuu gaari doonaa go'aan. Go'aanka markaa waa laguu soo diri doonaa.

Garsooraha wuxuu tixgelin doonaa codsigaaga magangalyo ayagoo xaaladaha kala duwan ee codsigaaga u dabakhaayo 'Refugee Convention (Heshiiska Qaxootiga)' iyo 'European Convention of Human Rights (Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadanaha)'. Waxay eegi doonaan haddii aad qabtid sababo macquul ah ee aad ku joogi kartid dalka UK.

Garsooraha wuxuu adiga (iyo looyarkaaga) iyo Home Office u diri doonaa nuqulka go'aankiisa. Go'aanka wuxuu xaqijin doonaa haddii garsooraha u maleeyo inaad qanciso shuruudaha fasaxa joogitaanka. Asaga ama ayada ayaa oggolaan karo ama diidi karo rafcaankaaga. Go'aanka waxaa xittaa ku qornaan doono sababta ka dambeesa go'aanka garsooraha.

4B.7 Markii go'aanka la sameeyo kadib

Xaalado gaar ah adiga iyo Home Office waxaad awoodi doontiin inaad rafcaan codsataan. Haddii aad joogtid dalka UK, waa in aad sameyso 10 maalmood gudaheeda, haddii aad ku jirtid xabsi, waa inaad racfaanka samayso 5 malmood gudaheeda, iyo haddii aad joogto dibedda UK waa inaad ku sameyso 28 maalmood gudaheeda. Codsiga fasaxa rafcaan-qaadashada waa in laga sameeyo Maxkamadda Sare ee Asylum Immigration Tribunal. Marxaladaan adiga ama Home Office waxaa idinla siin doonaa fasax aad ku sameysaan rafcaan haddii ay jiraan sababo macquul ah oo caddaynaayo in qalad sharciyeed laga sameeyey kiiskaaga.

Dalka Ingiriiska maxkamadda Upper Tribunal (Immigration and Asylum Chamber) ayaa la macaamiila:

- rafcaanada go'aanada uu First-tier Tribunal ka sameeyey arrimaha la xiriiraa haajiraada, magangalyada iyo dhalashada iyo;
- dib u eegida garsoorka (haajiraada)

Scotland kiiskaaga waxaa la hor gayn karaa maxkamadda lagu magacaabo Court of Sessions.

Waqooyiga Ireland kani wuxuu ahaan doonaa maxkamadda Queen's Bench Division.

Looyarkaaga ayaa arrimahaan kaa siin karo macluumaad dheeraad ah.

Xaq u yeelasho kale in rafcaan laga qaato ayaa jiri karo xaalado gaar ah oo waxaan kugula talineynaa inaad kuwaani kala hadasho looyarkaaga.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo ah in aad heshid qareen fadlan la xiriir:

Asylum Advice UK - 0808 8000 640
www.asylumhelpuk.org

Fadlan ogow in aannan wax caawimaad ah kaa siin karin kiiskaaga ama arrimahaaga socdaalka.

4B.8 Maxaa dhici doono rafcaankayga kadib?

Helidda go'aan fiican- Haddii go'aan fiican lagu siiyo oo kiiskaaga la oggolaado, oo Home Office uusan rafcaan codsanin, markaa waxaad xaqiijin ka heli doontaa Home Office in lagu siiyey sharciga 'Leave to Remain' ee dalka UK. (Fadlan akhriso deeqyada go'aanka kadib la baxsho.)

Rafcaan dheeraad ah – Haddii adiga ama Home Office rafcaan ka codsataan go'aanka oo la rafcaanka la aqbalo, maxkamadda wuxuu qaban-qaabin doonaa dhegeysiga dib u tixgelinta. Intii aad ka sugeysid in maxkamadda go'aan kale gaaro waxaad sii ahaan doontaa Magangalyo-doon (Asylum Seeker). Kani waa la oggolaan doonaa ama waa la diidi doonaa kadib markii kiiskaaga la maqlo.

Rafcaan dheeraad ah ma jiro – Haddii, kadib markay maxkamadda go'aan gaarto, aysan jirin sababo macquul ah ee rafcaan kale lagu sameeyo, ama codsi rafcaan kale la diido, markaa waxad noqon doontaa qof 'Appeal Rights Exhausted (Xaqa Rafcaanka Ka Dhamaadey) (ARE)'. Kani waxaa loola jeedaa inaad dib u ahaan doonin Magangalyo-doon sababtoo ah waad ku guuldareysatey codsigaaga magangalyo.

Haddii aadan qabin rafcaano dheeraad ah, Home Office wuxuu ka filan doonaa inaad ka baxdo dalka UK:

Home Office wuxuu filan doonaa inaad ka tagto dalka UK haddii:

- laguu diido magangalyo oo aan lagu siinin fasaxa joogitaanka;
- gaartey gaba-gabada hab-socodka rafcaanka; ama
- la noqoto codsigaaga magangalyo.

4B.9 Haddii aan si ikhtiyaar ah uga tego dalka UK?

Waxaa jira labo dariiq oo lagaa caawin karo haddii aad dooratid in aad u noqotid dalkaagii:

1) Waxaa jiro seddax hab ee lagugu caawin karo haddii aad go'aamiso inaad dalkaaga ku laabato: Waxaad codsan kartaa Assisted Voluntary Return (AVR) (Taageeridda Laabashada Ikhtiyaariga ah) ee Home Office-ka, macluumaad dheeraad ah ee si aad ula xiriirtid booqo ama eeg:
www.gov.uk/return-home-voluntarily
Voluntary Departures Team: 0300 004 0202

2) Waxaad laftigaaga qaban-qaabin kartaa sida aad dalkaaga ugu laaban leheed.Waa inaad la xiriirtaa Home Office kahor intii aadan qaban-qaabinin safarkaaga, si aad u soo qado baasaboorkaaga, dokumentiyada

safarka iyo kuwa kale ee xiriir la leh, kahor intii aadan safrin.

4B.10 Waa maxay AVR?

Barnaamajka Assisted Voluntary Return (AVR) waxaa maamula Home Office-ka. Waxay kugu caawin karaan inaad u laabato dalkaaga asalka ah ama dal kale haddii aad caddayn kartid inaad xaq u leedahay inaad halkaas ku noolaato. Helitaan macluumaad dheeraad ah fadlan booqo ama ka eeg:

www.gov.uk/return-home-voluntarily
Voluntary Departures Team: 0300 004 0202

4B.11 Ka warran haddii aan carruur qabo?

Haddii aad qoys leedahay weli dalka waa lagaa saari karaa. Home Office ayaa la shaqayn doono adiga iyo qoyskaaga si aad uga hadashaan xulashoyinkaaga. Waxay eegi doonaan xulashooyinkaan:

Assisted Voluntary Return - Macluumaad dheeraad ah ka eeg:
www.gov.uk/return-home-voluntarily
Voluntary Departures Team: 0300 004 0202

Required Return (Laabasho Loo Baahan Yahay)
Haddii aad diido inaad si ikhtiyaar ah uga baxdo dalka UK, Home Office warqad ayuu kuu soo diri doonaa oo kugu codsanaayo inaad dalka ka baxdo. Waxaad heli doontaa ogeysiis labo usbuuc ah in aad dalka ka baxdo oo waa inaad adiga iyo carruurtaada u diyaariso u laabashada dalkiina. Waxaa suurtogal ah inaad heli doontid xulashada aad ku maamusho laabashadaada.

Ensured Return waxaa la isticmaalaa markii xulashoyinka kale ee lagugu celiyo dalkaaga lagu guuldarreysto. Haddii aad gaarto marxalada laabashada hubaalka ah, kiiskaaga waxaa dib u eegi doono guddiga laabashada qoyska oo madaxbannaanan. Guddiga wuxuu talo ka bixin doonaa habka ugu habboon ee dalkaaga lagugu celin doono ayagoo go'aankooga ku salaynaayo badbaadinta wixii carruur ah.

Home Office wuxuu leeyahay xarun qoyska la dejiyo bixitaanka kahor. Kani waxaa lagu magacaaba Cedars oo wuxuu ku ag yaalaa Gatwick Airport. Guddiga laabashada qoyska wuxuu go'aamin karaa in dhammaan xulashoyinka laabashada la dhameystirey ama aan habboonayn.

4B.12 Maxaa dhacaayo haddii aan diido inaan laabto?

Haddii aad diido inaad isticmaasho wixii adeegyo kugu caawin karo laabashadaada ama ku dadaalin inaad ka baxdo dalka UK, markaa Home Office wuxuu qaadi doonaa tallaabo si uu si xoog ah dalka kaa saaro. Kani waxaa loola jeedaa inay si xoog ah kugu celin karaan dalkaaga.

Haddii Home Office tixgelinaayo inuu kaa saaro dalka UK, kiiskaaga waxaa laga qaadi doonaa Home Office UK Visas and Immigration Department oo waxaa loo gudbin doonaa Home Office Immigration Enforcement.

Immigration Enforcement (Fulidda Haajiraadda) waxay ku siin doonaan ogeysiis qoraal ah haddii ay rabaan inay kaa saaran dalka UK, oo waxay ku sheegi doonaan haddii aad xaq u leedahay inaad rafcaan ka codsato go'aankaan. Waa inay raacaan hab-socod sharciyeed oo awood siinaayo inay si xoog ah kaaga saaraan dalka UK haddii aad tahay qof la siiyey Appeal Rights Exhausted iyo aadan qabin aasaas sharciyeed kale aad halkaan ku joogto. Kani waxaa ka mid noqon karo xirid iyo in xabsi lagu geeyo illaa aad dalka ka baxdo. Sidoo kale, Immigration Enforcement waxay kaa codsan karaan inaad meel ay ayaga go'aamiyeen ka soo warbixiso waqti cayiman intii laga qaban-qaabinaayo ka saariddaada dalka. Home Office digniin la'aan ayuu ku xiri karaa intuu kuu qaban-qaabinaayo ka saariddaada dalka.

4B.13 Xaaladaha lagugu xiri karo

Home Office waxay eegi doonaan arrimahaan markii ay go'aaminaayaan haddii ay ku geynayaan xabsi iyo inkale. Kuwaani waa:

- Taariikhdaada horey ee haajiraada
- Dalkaaga asal ahaaneed
- Haddii aad raacdey shuruudaha joogitaanka ku meel gaarka ah (adigu si joogto ah ma saxiixi jirtey si waafaqsan IS96?)
- Suurtagalnimada inaad dhuumato.

4B.14 Ka warran haddii aan weli u maleeyo inuusan ammaan eheen inaan noqdo?

Haddii arrintaada magangalyada si buuxa loo go'aamiyey oo aad ku guuldareysatey, waa muhiim inaad raadsato talo sharciyeed haddii ay jiraan xulashooyin dheeraad oo kale iyo haddii ay jiraan dokumentiyo iyo codsiyo kale aad samayn kartid.

Waa inaad kani weydiiso looyarkaaga. Waa inay kuu macneeyaan dhammaan xulashoyinka kale markii ay kiiskaaga xirayaan.

Waxaad awoodi kartaa inaad codsi magangalyo cusub ka samayso Home Office. Si aad kani u samayso waxaad u baahan doontaa inaad caddayn dheeraad ah u dirto Home Office. Dokumentiyada waxay qayb wayn ka noqon doonaan codsi cusub haddii ay si wayn uga duwan yihiin waxyaabaha mar horey go'aan laga gaarey. Dokumentiyada waxay aad uga duwanaan doonaan kuwa horey haddii:

(i) horey loo tixgelinin; iyo

(ii) markii lala isticmaalo dokumentiyada garabsiinta ee mar horey la tixgeliyey, dhaliyaan fursad dhab ah inaad codsiga ku guuleysato, ayadoo la eegin diidmada.

4B.15 Maxaa ku dhici doono gargaarka aan helo haddii aan noq-do magangalyo-doon guuldareystey?

Haddii si buuxa laguu diido magangalyo, aadan qabin tiirsanayaal ka yar 18 jir oo noqoto Appeal Rights Exhausted (ARE) ama xulato inaad la noqoto codsigaaga magangalyo, waxaad lumin doontaa xaqa aad u leheed taageeridda 21 maalmood kadib markii codsigaaga si buuxa loo go'aamiyey. Waxaad warqad ka heli doontaa Home Office iyo waxaa lagu siin doonaa 7 maalmood ogeysiis ah aad hoyga ka baxdo haddii aad ku jirtid degaan ku siiyey Home Office.

Haddii aad qabtid tiirsanayaal ka yar 18 jir, taageeradaada Home Office wuu socon doonaa ilaa adiga iyo qoyskaaga si ikhtiyaar dalkiina ku laabataan, ama si xoog ah dalka lagaa saaro, ama ilaa ku tiirsanayaashaada gaaran 18 jir.

4B.16 Section 4 Support (Taageeridda Qaybta 4)

Taageerid waqti gaaban haddii aadan ku guuleysan codsigaaga Haddii taageeradaada la joojiyey waxaad xaq u lahaan kartaa taageerid waqti gaaban intii aad isku diyaarineysid inaad dalkaaga u laabato. Kani waxaa lagu magacaaba 'section 4 support' sababtoo ah waxaa lagu baxsha sida u qabo qaybta 4 ee Xeerka 1999 ee Haajiraadda iyo Magangalyada (Section 4 of the Immigration and Asylum Act 1999). Section 4 support waxaa loogu talagalay magangalyo-doonka guuldareystey. Section 4 support wuu ka duwan yahay taageerada aad heli jirtey intii uu codsigaaga magangalyada kuu socdey (Section 95 support (Taageeridda Qaybta 95)) sababahaan awgeeda:

- Ma jiro lacag lagu siin doono. Taageerada waxaa lagugu siin doonaa kaadh lacag-bixin. Kani waxaa lagu magacaaba kaadhka 'Azure'. Kaadhkaan waxaa lagu isticmaali karaa qaar dukaamo oo kaliya ee dalka UK sida - Tesco, Sainsbury, The Co-Operative, Morrisons, Peacocks, Early Learning Centre, Asda, Mothercare, The Red Cross iyo The Salvation Army.

Waa inaad qancisa shuruudo adag si aad ugu qalanto section 4 support. Waa inaad

ahaataa sabool (qof diihaalsan) oo qancisa hal ka mid ah shuruudahaan:

1) aad qaadeysid dhammaan tallaaboyika macquulka ah si aad uga tegto UK ama aad ku dadaaleyso inaad sidaas sameyso; ama

2) adiga ama xubin ka mid ah qoyskaaga aadan ka bixin karin dalka UK sababtoo ah aad qabtiin caqabad jireed ama caafimaadeed inaad safarto; ama

3) aad ka tegi karin dalka UK sababtoo ah, sida uu sheegaayo ra'yiga Xoghayaha Dawladda, iminka uusan jirin waddo suurto gal ah in lagu noqdo; ama

4) aad codsatey in codsigaaga magangalyo dib u eego garsoorka iyo lagu siiyo fasaxa aad rafcaankaas ku sameyso; ama

5) degaanka uu lagama marmaan u yahay kahortagga jebinta xuquuqyadaada sida uu sheegaayo Human Rights Act 1998.

1. Dhammkaan Tillaabooyinka Macquulka ah

Si aad xaq u lahaatid taageeridda qaybta 4 ee hoos yimaado shuruuddaan, waa inaad muujisa inaad qaadey tallaaboyinka oo dhan ee macquul ah aad uga tegto dalka UK. Home Office wuxuu diidi karaa taageeridda haddii uu maleeyo inaadan raacin xulashoyinka oo dhan ee aad heli kartid. Haddii tallaabo gaar ah uu 'macquul' yahay iyo inkale wuxuu ku xirnaan doonaa xaaladahaada. Caadi ahaan, waxaa lagaa filan doonaa inaad Home Office-ka ka codsatid laabashada ikhtiyaariga ah lana xiriirtid safaaradda dalkaaga si aad u qaban-qaabiso baasaboor deg-deg ah (haddii loo baahan yahay).

Macluumaad muhiim ah: Haddii aad u maleyso inaad qabtid sababo macquul ah aad ku samayn kartid codsi cusub waa muhiim inaad raadsato talo sharciyeed. Codsi walba ee dib u laabasho ikhtiyaar ah xittaa haddii lala noqdo wuxuu saamayn ku yeelan karaa codsigaaga cusub.

2. Caqabad Jireed ee lala Safro

Si aad shuruudaan xaq u yeelato waa inaadan safri karin xaalad caafimaad awgeeda. Waxaad u baahan doontaa inaad Home Office tusiso in adiga ama xulin ka mid ah qoyska uusan safri karin sabab caafimaad maskaxeed ama jireed awgeeda. Kuma filna in la muujiyo in dalka UK laga helo daawayn caafimaad ama in ra'yiga takhtarkaaga sheegaayo inaad safri karin. Waa inaad lahaataa xaalad caafimaad oo adiga iyo qoyskaaga aydaan awoodin inaad safartaan.

Waxaa loo baahan yahay caddeymo muujinaayo 'caqabad jireed inaad safarto':

• Waa in dokumenti qoraal ka hesho takhtarkaaga, gaar ahaan sheegaayo inaad awoodin inaad safarto, sababaha aad u safri karin iyo muddada uu suurtogal yahay inaadan safri karin.

• Waa inaad takhtarkaaga ka codsataa inuu dhammeystiro foomka 'Section 4 Medical Declaration' kani waxaad ka heli kartaa bogga internetka Home Office ama Asylum Help kala xiriir 0808 8000 640 ayadaana kuusoo diri karta nuqul foomka. .

Uur iyo caqabad jireed inaad safarto
Siyaasadda Home Office waa in haweenada kU jiro marxalada ugu dambeeyo ee uurka (lix usbuuc kahor waqtiga ay dhali lahaayeen, ama kahor haddii ay jiraad dhibaato caafimaad), ama kuwa leh cunug ka yar lix usbuuc, waxaa loo aqbalayaa ama loo oggolaanayaa si toos ah (automatically) maadaama aysan awoodin loo ogol yahay inay safri karin.

Waxaad u baahan doontaa inaad muujiso caddaynta uurka sida shahaadada hooyanimada, warqadda dhalashada iyo bayaan caafimaad haddii aad codsanaysid lix usbuuc kahor taariikhda foosha.

3. Uusan jirin waddo suurtogal ah in lagu noqdo
Shuruuddaan wuxuu khuseeyaa dad aan awoodin inay ka tagaan dalka UK sababtoo ah sida uu qabo Xoghayaha Dawladda uusan iminka jirin waddoo suurtogal ah in lagu noqdo.

4. Codsiga Dib u eegida Garsoorka
Haddii looyarkaaga uu sameeyey codsiga dib u eegida garsoorka ee codsigaaga magangalayada, waa inay marka horey High Court (Maxkamadda Sare) ka helaan fasaxa inay codsigaas socodsiiyaan. Markii High Court uu ku siiyey fasax aad codsigaas saameyso, waxaad xaq u lahaan doontaa taageeridda qaybta 4 ee hoos yimaado shuruudaan. Haddii aad ku nooshahay Scotland isla markaana aad arji u gudbisay Maxkamadda Qaybaha (Court of Sessions) markaas waxa aad dalban kartaa qyabtaan (this session).

Caddaymaha loo baahan yahay si loo garabsiiyo 'codsiga dib u eegida garsoorka':
Warqad ka socota High Court oo xaqiijinaayo in laguu fasaxey codsiga /xaqiijin ah in arjiga la gudbiyey (Scotland).

5. Human Rights Breach (Jebinta Xuquuqyada Beni'aadinka)
Home Office ma celin karo taageeradaada haddii markuu sidaa sameeyo uu sababi doono jebinta Xuquuqyadaada Beni'aadanka.

Inkastoo saboolnimada xaalado gaar ah loo arako inuu yahay wax jebinaayo Xuquuqyadaada Beni'aadanka qofka, magangalyo-doon ku guuldareystey codsiga ee aan loo arkin inuu ku dadaalo si uu ka baxo dalka UK xaq uma lahan taageerid. Sababta waxaa weeye, Maxkamadda waxay sheegeen in qofkaas xushtey inuu sabool noqdo, sidaas awgeedna taageero xaq uma lahan. Home Office waa inuu baxshaa taageero haddii xuquuqyadaada hoos yimaado European Convention of Human Rights (ECHR) la

jebiyo haddii uu ceshto taageerada.

Tusaale ahaan, haddii aad soo dirtey codsi magangalyo cusub, oo weli go'aan laga gaarin, qaybtaan ayaad u isticmaali kartaa codsigaaga taageerada. Waa sidaan xittaa haddii dib u eegid garsoore la soo diro laakiin weli lagu siinin fasaxa aad ku socodsiido codsiga. Waxaad xitta codsi ka samayn kartaa qaybtaan haddii qoyskaaga kala maqnaan doono markii qaar ka mid ah xubnaha qoyska loo diido taageerid.

Qareen ayaa kaa caawin kara haddii aad haysatid caddaymo cusub oo ah sababta aadan dib ugu noqon karin dalkaagii.

Haddii uusan Home Office-ka kuu jirin ku salaysan in aadan difaac haysan ama dammaanad (a non-protection based application) markaa xaq uma lihid taageero (support). Kani ma noqonayo mid kaa hor istaaga in aad ka baxdid UK si uu meesha uga baxo cawaaqibka wax la'aantu (to avoid the effects of destitution).

Caddaymaha loo baahan yahay si loo muujiyo 'jebinta xuquuqyada beni'aadanka' waxaa ka mid ah:

- Xaqiijin in codsi cusub la sameeyey
- Warqadaha dhalashada, caddaynta inaad qoys qabtid
- Nuqulka dokumentiyada aad u dirtey High Court.

Haddii aad u baahan tahay talo bixin dheeraad ah oo ku saabsan Qaybta 4 (Section 4) ama caawimaad ah helitaan sharci yaqaan ku matala, fadlan la xiriir Asylum Help kala xiriir lambarka: 0808 8000 640.

4B.17 Maxaa layga rabaa inaan sameeyo si aan u caddeeyo inaan sabool ahay?

Home Office wuxuu kugu aqoonsan doonaa saboolnimo haddii aadan heli karin 'degaan habboon' ama aadan qabin awood aad u qanciso 'baahidaada noololka aasaasiga ah' (sida helidda cunto, nal iyo meel qadacan) iminka ama 14ka maalmood ee soo socdo gudaheeda.

Waxa aad u baahan tahay in aad muujisid inaad iminka tahay ama noqon doontid 'guri'laawe waddada jiifa'. Waxaa ku filan inaad muujiso caddayn inaad heli doonin degaan habboon ama inaadan qancin karin baahidaada noolosha ee aasaasiga ah 14ka maalmood ee xiga gudaheeda.

Baaritaan wax la'aannimada (Destitution checks) waa la sii wadayaa taasoo keeni karta in macluumaad dheeraad ah la waydiiyo codsadaha.

Caddaynta loo baahan yahay si lagu muujiyo inaad tahay 'sabool':

- Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso liiska cinwaanada meelaha aad joogtey ilaa uu taageeriddaada ka joogsadey, waxaa kaasi dheeraad u ah faah-faahinta muddada aad joogtey cinwaan walba, iyo sababta uu taageeradaas u socon karin.
- Caddaynta hooyga ugu dambeeyo aad degneed, meesha uu ku yiiley iyo sababta aad hoygaas u joogi karin (tusaale ahaan warqad uu soo qorey saaxib ama qaraabada aad la degneed) - waxaa looga baahan yahay in ay muujisaa ama buuxisaa lixdii bilood ee ugu dambaysey
- Ogeysiiska guri ka saaridda iwm.
- Caddaynta taageerid samafal walba aad heshey ama isku dayid inaad raadsato taageerid samafal.
- Nuqulka bayaanka bankiga (haddii ay jiraan) ee 6da bilood ugu dambeeyo.
- Haddii aad tahay waalid keli ah, waxaa lagaa codsan karaa caddaynta inta jeer aad masruuf ka codsatey aabaha cunugga.
- Haddii aad horey u leheed fasaxa shaqada ama si sharci-darro ah ku shaqayn jirtey , waxaa lagaa codsan karaa warqaddaada P60 ee ugu dambeeyo iyo/ama warqadda mushaharka, iyo caddayn inaadan dib u shaqeynin ama xaq u leheen shaqo.
- Haddii aad ku nooshahay guri khaas loo leeyahay oo kiro ah, keen heshiiska kirada iyo wixi warqad ah ee lagaaga codsanaayo inaad ka baxdo guriga.
- Haddii aad horey u codsatey ceyrta dawladda ee caadiga ah, keen caddayn sheegaayo inaadan ceyrtaas xaq u leheen (tusaale ahaan warqad ka socota DWP).
- Waxaa xittaa caawinaad lahaan karo inaad diyaariso bayaan shakhsiyadeed ee khuseeyo sida aad isku masruufi jirtey laga bilaabo goorta taageerada horey lagaa joojiyey. Kuwaani waxay muhiim u noqon karaan dadka dhibaato ku qabo helidda macluumaadka loo baahan yahay.

4B.18 Sidee uu codsadaa Section 4 Support?

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheraad ah iyo talo khuseeyaa Section 4 Support (ay ku jirto u qalmidda) markaa waa inaad Asylum Advice UK kala xiriirto lambarka 0808 8000 640 ama eeg twww.asylumhelpuk.org.

Haddii aad mar hore go'aansatay in aad arji u qoratid taageero Section 4 una baahan tahay in lagaa caawiyo foomka arjiga, waxaad u baahan tahay in aad la xiriirtid Asylum Supprt Application UK kana wacdid lambarka 0808 8000 641 amd booqo/eeg www. asylumhelpuk.org. waxaad u baahan tahay in aad hubisid in aad haysatid dhammaan caddaymaha looga baahan yahay codsigaaga.

Waxaad u baahan tahay inad hubiso inaad haysato dhammaan caddaynta loo baahan yahay si aad ku codsato taageerid.

Macluumaad Muhiim ah: Xaq uma lahaan doontid taageerid ilaa uu Home Office socodsiiyo codsigaaga. Asylum Help waa ay kaa caawin kartaa arjigaaga hase waxaad u baahan tahay in aad keentid caddayn ah in aad tahay waxba laawe (destitute) iyo xaqiijin ama caddayn ah in aad buuxisay ama ku sugan tahay shuruudaha ama xaaladaha kor ku xusan.

Asylum Help waxa ay eegaysaa xaaladahaaga shakhsiga ah waxa ayna xaqiijinaysaa caddaymaha uu u baahan yahay Home Office-ku si loo baaro ama loo qiimeeyo in aad u qalantid ama caq u leedahay. Marka la helo waxa aannu kaa caawin karnaa arjigaaga kaalmo doonka ah. Haddii aysan Home Office-ka u muuqan ama aysan la ahayn in aad tahay waxba laawe ama mucsur (destitute) amase aadan ku sugnayn shuruudaha markaa waa ay diidayaan arjigaaga ama waxay ku waydiinayaa dokumenti dheeraad ah.

Haddii aad ku guul-darraysatid in aad keentid caddaymihii uu Home Office-ku ku waydiiyey waxaa laga yaabaa in arjigaaga la xiro ayadoo aan tillaabo ama ficil dambe laga qaadi doonin.

4B.19 Rafcaanka Section 4 Support

Haddii codsigaaga taageeridda Section 4 laguu diido waxaad xaq u lahaan kartaa inaad rafcaan ka codsato First-tier Tribunal (Asylum Support). Home Office waxay kuu soo diri doonaan warqad ay kugu diidaayaan taageerid. Warqadaan waxaa ku qornaan doono sababaha laguu diidey. Rafcaanada waa in la soo diro seddax maalmood shaqo gudaheeda laga bilaabo taariikhda go'aanka. Waa inaad la xiriirto Asylum Help sida ugu dhaqsi badan si ay kugu taageeraan rafcaanka.

Asylum Help waxa ay kula socodsiinaysaa haddii aad leedahay sababo aad racfaan ku qaadan kartid waxayna kuu sharraxaysaa dariiqyada kuu furan. Macluumaad dheeraad ah ka eeg Asylum Support Appeals Project website: www.asaproject.org

4B.20 Beddelka Xaaladaha

Waa muhiim inaad Home Office, maxkamadaha iyo looyarkaaga (haddii aad mid qabtid) u sheegto wararka ugu casriyeysan ee xaaladdaada. Kani wuxuu saamayn ku yeelan karaa kiiskaaga. Haddii aad ku guuldareysato inaad ogeysiiso beddelka cinwaanka waxaa suurtogal ah inaad wayso warqado muhiim ah ee ka socdo maxkamadda. Haddii aad cunug dhasho, iyo ku guuldareysato inaad soo sheegto, markaa cunugga laguma dari doono codsiga magangalyada. Home Office wuxuu u baahan yahay in la ogeysiiyo waxyaabahaan:

- haddii aad beddesho magacaada;
- haddii mid ka mid ah tiirsanayaashaada gaaro 18 jir;
- u guurto cinwaan ka duwan;
- guursato, kala tegtaan ama furto lammaanahaada;
- isbitaal lagu jiifiyo;
- adiga (ama lammaanahaada) uur yeelatiin ama cunug dhashaan.
- mid ka mid ah carruurtaada ka tego dugsiga, ama ka tego guriga;
- mid ka mid ah xubnaha kale ee qoyska kugu biiro UK, ama kaa tego;
- qof kale kugu biiro ama ka tego gurigaaga;
- lagu xiro;
- aad heshey lacag ama lagu siiyey lacag aad horey inoo sheegin;
- aad heshey lacag ama lagu siiyey lacag kadib markii aad wax iibisey ama
- adiga dib u doonaynin inaan hoy ku siinno.

Waxyaabaha kore waxay saamayn ku yeelan karaan taageeriddaada magangalyada ama waxaa loo baahan karaa in loo sheego maxkamadda/looyarkaaga.

Asylum Help waxa ay kaa caawin kartaa in ay talo siiso qaybta taageerada magangalyada ee Home Office-ka si xaaladda kore wax looga baddalo (the above circumstances). Hase yeeshee, waxaa muhim ah in aad adiguna ogaysiisid dhanka socdaalka ee Home Office-ka iyo Maxkamadaha isbaddalkas. Sharci yaqaanka ama qareenka ku matala ayaa ku taas kaa caawin kara.

Haddii aad doonaysid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha taageerada magangalyo doonka ama in aad heshid talo siin sharci ah fadlan la soo xiriir Asylum Help:

www.asylumhelpuk.org;

Asylum Advice UK 0808 8000 640

Asylum Support Application UK 0808 8000 641